

Multisystem Inflammatory Syndrome in Children (Caabuq Calaamado Badan oo Carruurta ku Dhaca) (MIS-C)

(Multisystem Inflammatory Syndrome in Children (MIS-C))

Macluumaadka Waalidka

MIS-C

Multisystem inflammatory syndrome in children (Caabuq calaamado badan oo carruurta ku dhaca) (MIS-C) waa mid dhif ah, oo waa halis ka timaadda COVID-19. MIS-C waxa uu sababi karaa caabuq ku dhaca wadnaha, sambabbada, kelyaha, maskaxda, maqaarka, indhaha, ama xubnaha caloosha iyo mindhicirka.

Maxaa Keena MIS-C?

Weli waa wax la baarayo waxa keena xanuunka MIS-C. Waxa la ogyahay waa in uu xanuunka MIS-C ku dhaco carruurta, sida COVID-19 ka dib ama marka ay ku dhawaadaan qof qaba COVID-19. MIS-C waa xanuun halis ah, laakiin marka carruurta goor hore laga helo oo laga gaaro waa ay ka bogsadaan.



Haddii aad ilmahaaga uga shakiso xanuunka MIS-C

Haddii aad ilmahaaga ku aragto calaamadaha MIS-C, la xiriir kilinigga ama dhakhtar. Haddii aadan haysan dhakhtar ama goob caafimaad, la xiriir 211 ama [211wisconsin.communityos.org](https://www.211wisconsin.communityos.org) si aad uga hesho caawimaad ah goob caafimaad.

Calaamadaha MIS-C:

- Calool-xanuun
- Daal
- Qandho
- Matag
- Finan
- Shuban
- Qoor-xanuun
- Indhaha oo noqda guduud

Garaac 911 ama si degdeg ah ula aad imarjansada haddii aad ilmahaaga ku aragto mid ka mid ah calaamadaha soo socda oo ah **xaalado degdeg ah:**



- Naqaska oo kugu dhegaya
- Xanuun ama cadaadis xabadka ah oo aan ka tageyn.
- Midabka bishimaha ama wejiga oo is beddela
- In uusan ilmuhu ka kici karin hurdo ama soo jeedi karin
- Jahawareer cusub
- Calool-xanuun daran

Helidda iyo Daaweynta MIS-C

Dhakhtarka ilmaha ama isbitaalku waxay sameyn karaan baaris badan oo lagu heli karo caabuqan sida:

- Sawirka gudaha ee uurkujirta
- Dhiigag badan
- Raajada xabadka
- Sawirka gudaha ee wadnaha

Carruurta laga helo MIS-C waa in lagu daaweeyo isbitaalka carruurta iyada oo la seexinayo qeybta garaabada.

Dhakhaatiirta ayaa laga yaabaa in ay ilmaha xanuunsan siiyaan daawo ay faleebbe ugu darayaan si ay ilmuhu caabuqa uga fiicnaadaan.

COVID-19 ka difaac ilmahaaga oo dhan

Sida ugu fiican ee looga hortagi karo MIS-C waa in ilmaha laga difaaco COVID-19. Waxa kale oo aan ognahay inaysan dadka qaar nasiib u lahayn oo aysan dhaqaalaha awgiis awoodin in ay sameeyaan wax kasta oo ah ka-hortagid.

Waa in la sameeyo wax kasta oo looga hortagi karo oo ilmaha laga difaaco COVID-19:

- Waa in ay ilmuhu soo qaataan tallaallada COVID-19 ee laga rabo, iyo xoojiyeyaasha haddii la idinkula taliyo.
- Waa in ay ilmaha ka weyn 2 jirka gafuurxir ku isticmaalaan meelaha uu ku badan yahay COVID-19 iyo meelaha gafuurxirka la iska rabo (sida goobaha daryeelka caafimaadka).
- Waa in aad fahamto khatarta ay qoyskaagu ugu jiraan COVID-19 si aad go'aan fiican uga gaarto badqabidda iyo caafimaadka qoyska.
- Iska hubso in ilmahaagu ay mar kasta gacmaha ku dhaqdaan biyo iyo saabuun ugu yaraan 20 ilbiriqsi.
- Ka fogow dadka xanuunsan oo dhan.
- Kala hadal dhakhtarka ilmaha wixii kale oo dheeraad ah oo aad sameyn karto si aad ilmahaaga uga difaacdo marka uu COVID-19 noqdo halis daran.



Faahfaahin badan oo ku saabsan MIS-C ka eego

- Booq barta internetka ee DHS: www.dhs.wi.gov/disease/mis-c.htm
- Centers for Disease Control and Prevention (Xarumaha Xakameynta iyo Ka-hortagidda Cudurrada): www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/daily-life-coping/children/mis-c.html

